Kireynta guri lagu noolaado

Marka aad guri kireysato, waxaad la galaysaa mulkiilaha guriga ballanqaad sharci ah. Ballanqaadkan waxaa loo yaqaanaa "heshiis guri" (lease), "heshiiska kireystaha" (tenancy agreement) ama "heshiis kiro" (rental agreement). Ballanqaadkan wuxuu noqon karaa mid qoraal ah ama mid wada hadal ah. Hubso in aad fahamtay waxa aad heshiiska ku galaysid.

Macluumaadka bogaggan ku qoran waxay khuseeyaan guryaha kirada ah badankood.

Laakiin qaar ka mid ah macluumaadkan ayaan laga yaabaa inayna khuseyn haddii:

- haddii aad deggan tahay meel qanacsi loogu tala galay,
- haddii aad jikada ama musqusha la wadaagtid milkiilaha ama milkiilaha qaraabadiisa,
- haddii aad deggantahay guri ku meel gaar ah,
- haddii aad guriga la wadaagtid ama aad ka kireysatay kireyste kale, ama
- haddii aad xubin ka tahay iskaashatada guryaha (housing co-operative).

Haddii uu shaki kugu jiro u tag lataliye sharci yaqaan ah.

Immisa lacag buu Mulkiilaha kiro ahaan codsan karaa?

Inta badan, mulkiilaha wuxuu codsankaraa in allale intii uu doono, marka uu guriga ka kireynaayo qof cusub. Intaa kaddib sharciga wuu xaddidaya inta kirada lagu kordhin karo iyo goorta la kordhin karo. Waxaad xog faah-faahsan ka heleeysaa xafiiska taakuleynta arrimaha sharciga (community legal clinic) ee kuu dhow.

Maxaa kaloo leyga rabaa in aan bixiyo inta aanan guriga soo degin?

Mulkiilaha guriga wuxuu kaa qaadi karaa lacagdhigasho (deposit) ah inta aadan soo degin guriga. Lacagtaasi waa kirada bisha ugu dambeyso oo aad guriga ka guuraysid. Mulkiilaha guriga lacagtan wax kale uma isticmaali karo.

Wuxuu kaloo mulkiilaha ku weydiisan kara lacag damiin ah si furaha laguu siiyo. Mulkiilaha guriga waa in uu kuu soo celiyaa lacagtan marka aad ka guureysid guriga oo aad furahana celisid.

Inta badan lacagaha loo dhigo damaanadda oo intaa ka duwan lama oggola.

Waa in aad markasta ka qaadataa caddeyn ama rasiid, markasta oo aad kiro bixisid ama waxyaabo kaleba. Sharciga wuxuu farayaa in mulkiilaha guriga uu ku siiyo rasiid haddi aad weydiisatid.

Miyaan u baahanahay inaan helo iyada oo qoraal ah?

Heshiisyada kirada inta badan waa inay ahaadaan kuwo qoraal ah ee lagu qoray foomka heshiiska kirada ee dawladda. Tani ma khuseeyaan haddii aad ku nooshahay guryaha dadweynaha, ama haddii adiga Kirada lagaa kabo ama ay ku saleysan tahay dakhligaaga.

Maxaa dhacaya haddi mulkiilaha guriga uu I takooro?

Sharciga xuquuqda aadanaha (human rights) wuxuu farayaa mulkiilaha guriga in uusan dadka midab takoorin. Takoorku (discrimination) wuxuu dhacaa haddii mulkiilaha uu diido in uu kaa kireeyo guriga ama uu si xun kuula macaamaloodo isagoo u aaneeynaayo:

- Midabka, jinsiga, da'da, hab galmoodkagaa, jinsiga aqoonsiga, muujinta jinsiga, xaaladda guurka, midabka, dhalashada, diinta, ama waddanka meesha aad ku dhalatay,
- adigoo naafa ah,
- ama adoo qaata lacagta taakuleynta dowladda,
- Ay jiraan carruur kula nool.

Tixdan waxay ku tuseeysaa waxyaabaha ka mid ah takoorka laakinse ma wada dhamma.

Mararka qaar takoorku wuxuu noqon karaa mid si toos ah. Tusaale ahaan, mulkiilaha waxaa laga yaabaa in uusan kaa kireynin guriga sabab la xiriirta diintaada ama sabab tixda kor ku xusan ka mid ah.

Marna takoorku wuxuu noqon karaa mid aan toos ahayn. Tusaale ahaan, mulkiilaha waxaa laga yaabaa in uu diido in uu beddelo ama uu dhiso waxyaabaha u sahli lahaa qof naafa ah oo kursi saaran in uu galo ama ka baxo guriga. Ama in uu diido in uu guriga ka kireeyo qof aan horey loogu aaminin deyn. Tani waxay mushkilad ku tahay dadka Kanada ku cusub.

Haddii uu mulkiilaha guriga ku takooro waxaa laga yaabaa in aad heshid taakuleyn sharci ah oo lacag la'aan ah.

Waa kuwee sharciyada kale oo uu raacayo mulkiilaha guriga?

Mulkiilaha guriga aad deggan tahay waxaan loo oggoleyn in uu kaa gooyo biyaha, korontada, kuleyliyaha, saliida ama gaaska, xitaa haddii uu lacag kugu leeyahay. Mulkiilaha guriga waa in uu kuu soo deeyaa kuleyl kugu filan marka lagu jiro xilliga qaboobaha.

Mulkiilaha guriga ma imaan karo gurigaada isaga oo si qoraal ah kuu soo ogeysiinin, 24 saac ka hor inta uusan gurigaada imaanin.

Mulkiilaha guriga aad deggan tahay waa in uu hagaajiyaa guriga ama qalabka aad guriga ku ijaaratay haddii ay wax ka xumaadaan. Tusaale ahaan sida kushiinka wax lagu kariyo, ama qaboojiyaha. Tani kuma xirna haddii uu heshiiska aad la gashay wax kale sheegaayo, ama haddii aad ka warheysay dhibkan inta aadan soo degin ka hor. Balse haddii aad adiga si ula kac ah aad u haleysid ama aad xanaaneyn weeyso qalabkaasi, waxaad ku qasbantahay in aad adiga sameeysid wixii aad qarribtay.

Mulkiilaha guriga waa in uu kaa nadiifiyaa dhiqlaha, baranbarada, dooliga ama cayayaan kale oo la mid ah.

Maxaa dhacaya haddi mulkiilaha guriga uu sharciga jebiyo?

Waxaad raadsataa talooyin sharci ah, haddii uu mulkiilaha guriga aad deggentahay uu raaci waayo shuruucdan. Mararka qaar waxaa jira waqti xadiidan oo gaarayo ilaa hal sano si loo qaado talaabo sharci ah. Markasta waxaa fiican in aad bixisid lacata kirada. Haddii aadan bixin wuxuu mulkiilaha guriga isku dayi karaa in uu guriga kaa saaro.

Maxaa dhici kara haddii aan doono in aan guuro?

Inta badan waxaa waajib kugu ah in aad qoraal ugu sheegtid mulkiilaha lixdan maalmood ka hor inta aadan guurin. Tani waxaa la yiraahdaa "digniin bixin" (giving notice).

Waxaa jira shuruuc badan oo ku lug leh arrimaha digniin bixinta, iyo waxaa aad ku xusi/qori lahayd. Waxaa arrintan si cad kuugu sheegi kara xafiiska taakuleynta sharciga. Haddii aad raaci weydid sharcigan wuxuu mulkiilaha kuugu yeelanyaa lacag fara badan. ⬟

Xaashiyahan waxay ku siinayaan xog guud oo keli ah. Waa in aad heshid talo sharci ah ee khuseeya xaaladaada oo kuu gaarka.

Xogtan waxay ku qoran tahay af soomaali waxaana laga tarjumay nuqul Ingiriisi ah. Haddii aad fahmi wayso, fadlan u noqo nuqulka afka Ingiriisiga ah.

Sida loo helaa taakuleyn

211 Ontario waa qadka degdega ee macluumaadka ama gudbinta oo kaalmo ku bixisa afaf badan. Waxay teleefanada qabtaan 24 saacadood maalintii, isbuucii 7 maalmood.

Waxay kuu sheegi karaan:

- sida aad ula xiriirayso rugta sharciga bulshada,
- meelaha kale aad kaalmo sharci ka heleyso, iyo macluumaad iyo
- sida loola xiriiro hay'ada dejinta ama hay'adaha bulshada ee noocyo kale kuu caawiya.

Waxaad kaloo isku dayi kartaa inaad la xiriirto maktabada maxaliga ama rugta sharciga ee bulshada.

211 Ontario kala xiriir:

- ☎ Telefoonka **211**
- ☎ TTY **1-888-340-1001**
- 💻 **211ontario.ca**

Waxaa soo diyaariyey CLEO (Community Legal Education Ontario/Éducation juridique communautaire Ontario) iyagoo ay kala shaqeyeen CLEO Six Languages Advisory Group, oo ka kooban 10 hey'adood oo xubin ka ah.
Mashruucaan waxaa maalgaliyey Ontario Trillium Foundation iyo Legal Aid Ontario.
Websiteka CLEO's ee **Steps to Justice** ayaad ka heli macluumaad ku saabsan tallaabooyinka sharci ee caadiga ah. Booqo **stepstojustice.ca**. Booqo **cleo.on.ca** si aad bogogaan iyo warar kale ugula soo baxdid.